



Codsiga Cabashada Bulshada Waxbarashada Gaarka ah (Special Education Community Complaint, SECC)

(Isticmaal foom ka duwan si aad u xaraysato [Nidaam cadaalad ah](#))

Foomkan waa ikhtiyaari. Xafiiskayagu wuxuu isticmaali doonaa macluumaadka aad bixiso si uu uga shaqeyo cabashadaada. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (Individualized Education Program, IEP) iyo xuquuqda ardayga/qoyska, ka eeg websaytka [Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha \(Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI\), Xalinta Khilaafaadka Waxbarashada Gaarka ah.](#)

<p>U dir: Dr. Tania May Assistant Superintendent OSPI, Special Education PO Box 47200 Olympia, WA 98504-7200 Fakiska: 360-586-0247 speced@k12.wa.us</p> <p>Taariikhda La Diray: _____</p>	<p>Sidoo kale u dir: Hay'adaha dadweynaha ama agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmada; iyo/ama, kormeeraha degmada. Macluumaadka xiriirka degmada waxaa laga heli karaa Hagaha Waxbarashada Gaarka ah.</p> <p>Nuqulka cabashadan waxaa lagu bixin karaa iimayl, fakis, ama nuqul qoraal ah. Hoos, fadlan ku dar magaca hay'ada dadweynaha/degmada dugsiga iyo sida nuqulka loo bixiyay.</p> <p>_____</p> <p>_____</p> <p>_____</p> <p>Taariikhda La Diray: _____</p>
--	--

Tilmaamaha Cabashada Bulshada ee Waxbarashada Gaarka ah

Wixii caawimaad ah ee buuxinta foomkan, ama si aad u codsato qaab aad heli karto, fadlan kala xiriir Office of Superintendent of Public Instruction, Waaxda Waxbarashada Gaarka ah, 360-725-6075 ama speced@k12.wa.us.

Waa inaad u soo dirtaa nuqulka cabashadaada OSPI iyo dugsiga/degmada/wakaalada dadweynaha isku mar. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka xiriirka dugsiga/hay'ada [Hagaha Waxbarashada Gaarka ah.](#)

Cabashadaadu waa inuu ku jiraa saxeexaaga. Saxeexa ayaa looga baahan yahay Xeerka Dadka Naafada ah (Individuals with Disabilities Education Act, IDEA) iyo xeerarka waxbarashada gaarka ah ee Washington.

Cabashadaadu waa inay ku jirtaa magacaaga iyo macluumaadkaaga xiriirka. Magaca iyo macluumaadka xiriirka waalidka ama qofka cabanaya waa loo baahan yahay. Magaca iyo macluumaadka xiriirka ardayga ayaa sidoo kale loo baahan yahay, haddii cabashada ay ku lug leedahay eedeymo la xiriira arday la magacaabay.



Qeybta I: Macluumaadka Ardayga (Ku saabsan karaa cabashooyinka la xiriira arday(da) gaar ah)

OSPI waxay ku dadaashaa u dhanaanshaha iyo dhaqamada xiraya daldaloolada ka dhex jira fursadaha. Haddii aad si ikhtiyaari ah u bixiso macluumaadka ku saabsan xaalada naafada, isirkaaga, iyo jinsiga ilmahaaga, macluumaadkaaga qarsoodiga ah waxaa loo isticmaalaa oo kaliya si loo aqoonsado isbadalada guud ee gobolkeenna iyo si loo horumariyo hagitaanka OSPI iyo hababka xalinta khilaafaadka. *Haddii cabashadu ay ku saabsan tahay in ka badan hal arday, fadlan isticmaal bog dheeraad ah.*

Magaca Ardayga	Xaalada Naafada Ardayga (Ikhtiyaari)	Fasalka, Isirka/Qowmiyada, Jinsiga (Ikhtiyaari)
Wakaalada Dadweynaha (Loo baahan yahay)	Magaca Dugsiga (Ikhtiyaari)	

Qeybta II: Macluumaadka qofka Cabanaya

Magaca	Luuqadda Hooyo (Ikhtiyaari)
Cinwaanka Deegaanka	Habka Isgaarsiinta ee La Doorbidayo (Ikhtiyaari)
Magaalada/Gobolka/Koodhka Boostada	Isirka/Qowmiyad, Jinsiga (Ikhtiyaari)
Macluumaadka Xiriirka: Talefoonka ama limaylka	Xiriirka ardayga kaala dhexeeya (waalidka/masuul/Wax kale) (Ikhtiyaari)
X Saxeexaaga	Taariikhda

Qeybta III: Eedaymo - Maxaad u malaynaysaa in hay'ada/degmada/dugsigu khalad u sameeyeen?

A. Bayaankaaga xadgudubka(yada) lagu eedeeyay:

Uma baahnid inaad ogaato sharciga gaarka ah ee laga yaabo in lagu xadgudbay, laakiin fadlan si cad u qeex waxa aad aaminsan tahay in hay'ada/degmada/dugsigu ay khalad u sameeyeen, sida: "Macalimiintu ma raacayaan IEP-ga ee ilmahayga." Fadlan ku lifaaq bogaga haddii aad u baahan tahay meel banaan oo dheeraad ah oo aad wax ku qorto. OSPI waxay baari kartaa oo kaliya eedeymaha waxbarashada gaarka ah ee dhacay hal sano gudaheed laga bilaabo taariikhda cabashadaada la helay. Tusaale ahaan, haddii aan helno cabashada Oktoobar 1, 2021, waxaan baari karnaa mudo ka bilaabaneysa Oktoobar 2, 2020.

Waxaan aaminsanahay in dugsigu ku xadgudbay sharciga waxbarashada gaarka ah:

B. Xaqiiqooyinka ku saabsan eedaymahaaga:

Fadlan ku dar taariikho gaar ah, wakhtiyo, iyo faahfaahin kasta oo kale oo khuseeya wixii dhacay.

C. Waa maxay dhukumiintiyada taageeraya eedeeyntaada? (Ikhtiyaari)

Waraqaha uu soo diray dugsiga, qiimaynta ardayga iyo IEP, ogaysiisyada, iyo dhukumiintiyada kale ayaa laga yaabaa inay ku caawiyaan inay muujiyaan waxa dhacay iyo waxaad aaminsan tahay in dugsigu khalad sameeyay. Inta lagugu dhiirigelinayo inaad ku lifaaqdo dhukumiintiyadan, ma aha qasab.

D. Maxaad jeceshahay inay dhacaan?

Fadlan sharax talaabada ama daaweynta aad jeclaan lahayd inaad aragto haddii OSPI ay go'aamiso in dugsigu ku xadgudbay xuquuqda ardayga.

Macluumaadka Cabashada Bulshada ee Waxbarashada Gaarka ah

Midani miyay xiriir la leedahay wax aan ahayn adeegyada waxbarashada gaarka ah?

Haddii cabashadaadu ay la xiriirto takoor ama xuquuqda ardayga sida hoos timaada Qeybta 504 ee Sharciga Dhaqan-celinta, fadlan kala xiriir Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah 1-800-421-3481, ama Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ee OSPI lambarka 360-725-6162. Su'aalaha ku saabsan anshaxa xirfadeed waa in lagu hagaajiyaa Xafiiska Dhaqanka Xirfadlayaasha (Office of Professional Practices, OPP) lambarka 360-725-6130.

Macluumaadka la wadaago inta lagu jiro baaritaanka cabashada

Xeerarka waxbarashada gaarka ah ee Washington waxay u baahan yihiin OSPI inay la wadaagto dhukumiinti kasta oo ay degmadu siiso waalidka/caweeyaha iyo macluumaad kasta oo waalidka/qofka cabanaya la wadaago degmada taasoo qayb ka ah baaritaanka. Haddii qofka cabanaya uusan ahayn waalidka/masuulka ardayga cabashada ku jira, OSPI waxay u baahan tahay shaacinta macluumaadka, oo uu saxeexay waalidku, kahor inta aan la wadaagin macluumaadka shakhsi ahaaneed ee lagu aqoonsan karo ardayga. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habraaca cabashada, eeg: [Guudmarka Habraaca Cabashada](#).

Xogta Tirakoob ahaaneed

OSPI waxay ku dadaashaa u dhanaanshaha iyo dhaqamada xiraya daldaloolada ka dhex jira fursadaha. Haddii aad si ikhtiyaari ah u bixiso macluumaadka ku saabsan xaaladda naafada ilmahaaga, isirka iyo qowmiyada xubnaha qoyskaaga, iyo aqoonsiga jinsiga ee ardaygaaga, waxaanu ilaalin doonaa qarsoodinimada macluumaadkaaga waxaana u isticmaali doonaa oo keliya si aan u aqoonsano isbadalada ka jira gobolkayaga. Waxaan u isticmaalnaa macluumaadkan wadar ahaan, anagoo aan ku xirin arday ama qoys gaar ah, si aan si joogto ah u wanaajino hagitaankeena dugsiyada Washington iyo si aan u wanaajino hababkayaga taageera xuquuqda ardayda iyo qoysaska.

OSPI, sida caadiga ah, lama wadaagto macluumaadka (tusaale, iimaylada iyo dhukumiintiyada waxbarashada gaarka ah) ee la siiyo OSPI inta lagu jiro habraaca baaritaanka SECC shakhsiyaadka kale, hay'adaha, ama wakaaladaha dalwada dhexe ama gobolka.

Xubnaha dadwaynaha waxa laga yaabaa inay codsadaan inay helaan macluumaadkaas sida hoos timaada Xeerka Diiwaanka Dadweynaha ee gobolka Washington (Washington state's Public Records Act), laakiin haddii ay dhacdo codsi noocaas ah, dhawr "ka dhaafitaan" ayaa jira. Haddii si kale loo dhigo, waxa jira dhawr nooc oo macluumaad ah oo xubnaha dadweynuhu **aysan** heli karin. Muhiimad ahaan, macluumaadkan soo socota **ma** bixin doonto OSPI iyadoo laga jawaabay codsiga diiwaanka dadweynaha:

- Macluumaadka, kaligiis ama isku-darka, waxaa lagu xiriiriya ama lala xiriirinayo arday gaar ah taas oo u oggolaanaysa qof macquul ah oo ka tirsan bulshada dugsiya, oo aan lahayn aqoonta shakhsi ahaaneed ee duruufaha khuseeya, inuu u aqoonsado ardayga si macquul ah hubaal. Tusaale ahaan, macluumaadka ku saabsan naafanimada ilmahaaga ama isirka iyo qowmiyada.
- Macluumaadka shakhsi ahaaneed ee xubnaha qoyska ama mas'uuliyiinta ardayga hadii macluumaadka ay keeni karto in la shaaciyo macluumaadka shakhsi ahaaneed ee ardayga.
- Macluumaadka xiriirka xaaladaha degdega ah ee xubnaha qoyska ama mas'uuliyiinta.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan codsiyada diiwaanka dadweynaha, fadlan tixraac kheyraadkan:

- [Codsiga Diiwaanka Dadweynaha ee OSPI](#)
- [Xeerarka Ka dhaafitaanka Diiwaanada Dadweynaha ee OSPI](#)
- [Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud \(WA Office of the Attorney General\): Helitaanka Diiwaanada](#)